**GUUDMARKA**

Maxay SPD u rakibaysaa kaamirooyinka CCTV?

Ujeedada barnaamijka kaamirooyinka CCTV waa in laga hortago dambiyada, la uruuriyo cadeyn la xiriirta fal danbiyeedka daran iyo/ama hubaysan, loolana xisaabtamo danbiileyaasha. Kaamirooyinku sidoo kale waa baritaareyaasha ciidanka wakhtiyada ay jiraan hoos u dhaca lama filaanka ah ee ciidanka roondada iyo baaritaannada.  Ayagoo la shaqeynaaya Real-Time Crime Center (Xarunta Gurmadka Degdega ah ee Dambiyada), kaamirooyinka ayaa sidoo kale siinaaya xogta muuqaalka ah baareyaasha wakhtigaas taasoo ka caawinaysa saraakiisha ka jawaabaaya wicitaannada.

Xagee ayaa lagu rakibayaa kaamirooyinka?

Kaamirooyinka ayaa lagu rakibi doonaa goobaha deegaanka ee rabshada hubaysan, tahriibinta dadka, iyo dambiyada kale ku badan yihiin.Booqo seattle.gov/CCTV si aad u aragto khariirada goobaha kaamirada.

Kaamirooyinka CCTV ma kuwo abadiyan ah baa?

Kaamirooyinka ayaa qayb ka ah Technology-Assisted Crime Prevention Project (Mashruuca Kahortaga Danbiyadda ee Tignooloojiyadu Kaabayso), kaas oo tilmaamaha aagaga ay ka dhacaan dambiyada hubaysan, tahriibinta dadka, iyo danbiyadda kale ee joogtada ah. Fadlan booqo seattle.gov/CCTV si aad u hesho goobaha kaamirooyinku ku xiran yihiin. Mashruucaan ayaa ku dhisan xog iyo tusmayn. Waa la joojin doonaa haddii xogtu muujiso in tignoolojiyadu aysan waxba tarayn.

**MAAMULIDA KAAMIRADA**

Yaa ansixiyay rakibaadda iyo adeegsiga kaamirooyinka CCTV?

Miisaaniyadda Duqa Magaallada Harrel ee 2024 ayay ku jirtay maalgelin lagu samaynaayo kaamirooyinka CCTV, taasoo ay ansixisay Seattle City Council (Dawlada Hoose ee Seattle). Bishii Oktoobar 2024, Seattle City Council ayaa ansixiyay barnaamijka tijaabada ah ee kaamirada CCTV kadib markii ay akhriyeen Warbixinta Saameynta Muraaqabada, taasoo oo ay amartay City Council sanadkii 2023.

SPD ma la socon doontaa kaamirooyinka markasta?

Maya, Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska Seattle) ma haysato shaqaale 24 saac maalintii daawanaaya kaamirada layfka ah, todobo maalmood asbuucii. Inta badan daawashada kaamirada ayaa noqon doonta ka jawaabida wicitaanka 911 si loo taageero gurmadka booliiska. La socoshada tooska ah ee kaamirada CCTV ayaa lagu saleyn doonaa dhacdooyinka danbiyada,

heerarka danbiyada, dhacdooyinka waawayn ee khuseeya tirada badan ee dadka, iyo arimo kale. **Haddii aad goobjoog u ahayd fal danbiyeed, wac 911 isla markaba – ha filan in kaamirooyinka CCTV ay kaa daawanayaan shaqaalaha SPD.**

Kaamiradu ma duubi doontaa wax cod ah?

Maya. SPD lama socon doonto ama ma duubi doonto cod.

Muddo intee dhan ayay SPD haynaysaa muuqaal la duubay?

Haynta muuqaal laga duubay kaamirooyinka ayaa noqon doonta 30 maalmood, marka laga reebo muuqaallada kooban ee muujinaaya fal danbiyeed kaasoo loo gudbin karo kaydka cadeynta ee casriga ah ee SPD.

AI ama qiimeynta muuqaalka ma la daari doonaa ama la adeegsan doonaa?

Kaamirooyinka iyo softweerka la xiriira ayaa awood u leh inuu adeegsado aqoonsiga shayga, kaas oo la daari doono. Tusaale, haddii qofka lagu eedeeyay toogashada uu waday gaari qabaal ah oo buluug ah, kaamirooyinka ayaa awoodi doona inay sheegaan wakhtiga gaariga qabaalka ah ee buuluga ah ay qabatay kaamiradu si loo caawiyo baareyaasha. **Kaamirooyinku ma adeegsan doonaa aqoonsiga wajiga.**

SPD ma u adeegsan doontaa muuqaalka kaamirada CCTV aqoonsiga wajiga?

Maya. SPD ayaan adeegsan doonin aqoonsiga wajiga marna kaamirooyinka CCTV.

Kaamirooyinka CCTV ma lahaan doonaan tignoolojiyada sida ootomaatiga ah u akhrida taargada gaariga?

Maya. Kaamirooyinka CCTV ma lahaan doonaan tignoolojiyada sida ootomaatiga ah u akhrida taargada gaariga.

## SIRTA IYO BAAHINTA MUUQAALKA

Sidee ayaa loo difaacayaa sirtayda?

Kaamirooyinka CCTV ayaa loo jeedin doonaa dhanka wadada, geesaha wadada, iyo aagaga kale ee dadwaynaha keliya, meelahaas oo aan caadiyan lahayn filashada ilaalinta sirta.

Kaamirooyinku ma awoodi doonaan inay arkaan gudaha guriga?

Maya. Ayadoo qayb ka ah rakibaada kaamirada SPD iyo hanaanka dejinta, difaaca muuqaalka ayay marin doonaan farsamo yaqaannada IT ga ee Seattle si looga qariyo daaqadaha ka koreeya dhulka kuwaasoo ah deegaan dad degan yahay. Difaacaan casriga ah ayaa qarin doona aaga ka horeeya difaaca, taasoo ka dhigaysa inaan laga daawan karin daaqadaha muuqaalka kaamirada. Difaaca ayaan "meesha looga saari karin" tignoolojiyad kasta waxayna saarnaan doonaan duubitaanno kasta.

Muuqaalka ma lala wadaagi doonaa wakaaladaha kale ee sharci fulinta?

Xogta laga helo kaamirooyinka ayaa lala wadaagi karaa wakaaladaha kale ee ka baxsan SPD, shirkadaha, ama shaqsiyaadka ayadoo la raacaayo xeerarka sharciga ee bixinaayo sharcigu. Qaybo gaar ah oo kamid ah xogta ay soo uruursheen kaamirooyinka CCTV ayaa lala wadaagi karaa wakaaladaha kale ee sharci fulinta ee ku jira qodobada loo baahan yahay, ayadoo la xiriirta baaritaannada booliiska oo ay wada jir u fulinayaan wakaaladahaas, ama si looga jawaabo codsiyada ka imaanaaya wakaaladaha booliiska ee baaraaya fal danbiyeed sida ku qoran Policy SPD (Xeerka SPD) 12.050 iyo 12.110. Dhammaan codsiyada xogta ee ka yimaada maamullada Federal Immigration and Customs Enforcement (ICE, Ciidanka Federaalka ee Socdaalka iyo Xuduudaha) ayaa loo gudbiyaa Mayor’s Office Legal Counsel (La Taliyaha Sharciga ee Xafiiska Duqa Magaallada) sida waafaqsan Mayoral Directive (Amarka Duqa Magaallada), oo ku taariikhaysan Febraayo 6, 2018.

Waxaan ka walwalsanahay in muuqaalka lala wadaago goballada kale marka laga hadlaayo kiisaska daryeelka caafimaadka ee ilmo iska soo ridista iyo daryeelka xaqiijinta jinsiga la xiriira – SPD ma la wadaagi doontaa muuqaallada kiisaskaas quseeya?

Maya. Sida ku cad sharciga gobalka (Revised Code of Washington (RCW, Sharciga Wax laga Badelay ee Washington) 10.96.040) iyo xeerka dadwaynaha ee Gobalka iyo magaallada, SPD ayaan gacan ka gaysan doonin wax baaritaannada booliiska ah oo khuseeya ilmo iska soo ridista ama daryeelka xaqiijinta jinsiga.

Waxaan ka walwalsanahay in muuqaalka lala wadaago wakaaladaha socdaalka ee federaalka – SPD ma la wadaagi doontaa muuqaallada kiisaskaas khuseeya?

SPD kama qaybgasho kamana qaybgeli doonto dedaalka socdaalka laakiin waa lagu qasbi karaa inay xogtaas la wadaagto sida ku cad sharciga federaalka. Hase yeeshee, SPD ayaan wadaagin xogta aysan haysan. Xeerka SPD ayaa ka mamnuucaaya xubin kasta oo kamid ah waaxda inuu raadiyo xogta aqoonsiga socdaalka, SPD ayaana uruurin ama hayn diiwaannada la xiriira aqoonsiga socdaalka ilaa in xogtaas si toosan loo siiyo waaxda sababo faa'iido u leh qofka sharciga aan haysan, sida codsiyada xaqiijinta U-Visa ama T-Visa, kuwaasoo laga reebay in la shaaciyo sida ku cad sharciga Washington. Marna qof laguma qasbi karo inuu siiyo SPD wax xog ah oo la xiriirta xaaladiisa socdaalka.

Dadwaynuhu ma arki karaan muuqaallada tooska ah ee kaamirada?

Maya. Dadwaynuhu ma arki karaan muuqaallada tooska ah ee kaamirada.

Qareennada difaacu ma arki karaan muuqaalka la duubay?

Qareennada difaaca danbiyada ayaa arki doona muuqaalka kaamirada CCTV ayadoo qayb ka ah hanaanka shaacinta dacwadda danbiga.

**SAAMAYNTA AY KU LEEDAHAY DANBIGA**

Danbigu ma u wareegi doonaa meelo kale?

SPD ayaa samayn doonta qiimeyno joogto ah si loo aqoonsado saameyn kasta ay meesha lagu xiraayo CCTV ku yeelanayso cayrinta ama u wareejinta danbiga meelo kale. Waxaa intaas dheer, City's Office of Inspector General (Xafiiska Taliyaha Guud ee Booliiska Magaallada) ayaa u yeeray khubarada arintaan oo waaxda ka baxsan si ay u qiimeeyaan waxtarka guud ee Technology Assisted Crime Prevention Project.

Sidee ayaa guusha mushruucaan lagu cabiri doonaa?

Dhaqan gelinta guuleysata ee CCTV ayaa lagu qiimeyn doonaa heerka hoos u dhaca danbiyada hubaysan, wakhtiyada gurmadka koobaad ee muhiimada, in uusan kordhin ama hoos u dhicin cabbirada booliiska xad dhaafka u jooga aaga, cabirka saamaynta kala duwan, iyo kororka fikradaha kalsoonida iyo badqabka. Cabiradaan ayaa lagu soo daabici doonaa seattle.gov/cctv.

Ka waran haddii kaamiradu i qabato anoo ka cararaaya nalka cas ama jebinaaya sharciyada kale ee wadooyinka, SPD ma waxay igu soo saaraysaa ganaax?

Maya. Kaamirooyinka CCTV looma adeegsan doono ilaalinta sharciyada wadooyinka. SPD ayaa leh kaamirooyinka gaarka ah ee qabta sawirada xadgudubyada sharciga wadooyinka kuwaasoo ah kaamirooyin iyo softweer gaar ah.

**XIRIIRKA**

Yaan kala xiriirayaa su'aasha la xiriirta kaamirooyinka CCTV ee SPD?

Waxaad u diri kartaa su'aalaha SPD_CCTV@seattle.gov. Waxay qaadan kartaa dhawr maalmood in su'aalaha laga soo jawaabo.